



Salaadaha ugu culus munaafiqiinta waa labada salaadood ee cishaha iyo subaxa, hadayse ogaan lahaayeen waxa ku jira ee fadligooda ah waxay ku imaan lahaayeen gurguurasho

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: "Salaadaha ugu culus munaafiqiinta waa labada salaadood ee cishaha iyo subaxa, hadayse ogaan lahaayeen waxa ku jira ee fadligooda ah waxay ku imaan lahaayeen gurguurasho, waxaan ku hamiyey in salaada la aqiimo oo aan nin jamaca tujiya aan u diro, aniguna intaan kaxaysto rag xirmooyin xaabo ah sita oo aan aadno qolada aan salaada imaanin oo aanu dab ku soo gubno guryahooda.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu sheegay in munaafiqiinta iyo ka caga jiidkooda iyo karahsigooda salaadaha, gaar ahaana labada salaadood ee cishaha iyo subaxa, haday ogaan lahaayeen ajarka iyo fadliga ku jira salaadaha oo jamac lagu tukado way imaan lahaayeen xataa sida caruurta gur-guurad ay gacmaha iyo jilbaha ha ku yimaadeene. Nabigu wuxuu go'aan saday inuu amro in salaadda la aqiimo, oo nin dadka ka mida imaam noqdo oo dadka tujiyo, isaguna intuu kaxaysto kuwo xaabo sida oo ay aadaan raga aan salaada jamaca imaanayn oo uu guryahooda dab ku soo gubo, waayo waxay sameeyeen ee dambi ah awgeed laakiin muuna samayn, dadka guryaha jooga ee dumar, caruur aan dambi lahayn, iyo dad ka loo cudur-daarle dambina aan lahayn dartood ayuuna sidaa u samayn.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3366>

